

<b>JAMHUURIYADDA</b>		<b>SOMALILAND</b>
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
<b>SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE</b>	التَّشْرِيَةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيَلَانْد	
<b>XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA, E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</b>		
Sanadka: 1aad	Cadadka: 12aad ee December	Taariikh: 05/01/2013
<b>QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.</b>		
<b>RUKUNKA (Subscription):</b>		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.</i>		

**TUSMADA CADADKA**

<b><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA</b>	
<b>IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</b>	
1) GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2013ka, IYO LIFAAQYADA KU LAMAAN.	456
<b><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA</b>	
<b>IYO DIKREETOYINKA</b>	
<b>MADAXWEYNAHA:</b>	
2) Dhaqan-galka Miisaaniyad	
Sannadeedka 2013-ka	458
3) Siyaasadda Guud ee Miisaaniyadda 2013	460
4) MAGACAABID, <u>XEER MADAXWEYNE Na: 0277/122012</u>	469
5) MAGACAABID, <u>XEER MADAXWEYNE Na: 0278/122012</u>	470
6) Xil-ka Qaadis; <i>December 21, 2012.</i>	471

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA, WAREEGTOYINKA,  
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA  
WASIIRADA, IWM**

- |    |                                     |        |     |
|----|-------------------------------------|--------|-----|
| 7) | Wareegto Wasiirka Arimaha Gudaha    | Xeer   | 472 |
|    | No: 25/12                           |        |     |
| 8) | Wareegto Wasiirka Cadaalada (Fulin  | Go'aan | 474 |
|    | ka soo baxay Gudiga Cadaaladda JSL, |        |     |
|    | WC&A.G/XW/G-2/                      | /12    |     |
| 9) | Wax ka Bedelka Tacriifada           |        | 478 |

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

- |     |  |             |     |
|-----|--|-------------|-----|
| 10) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 480 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Togdheer            | 11/12/2012  |     |
| 11) | Amar Xayiraad, Maxkamada Sare JSL        |             | 483 |
|     | Tix.ms/140/012.                          |             |     |
| 12) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 485 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Awdal               | 15/12/12    |     |
| 13) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 493 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Maroodi-jeex        | 16/12/2012. |     |
| 14) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 499 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Saaxil              | 17/12/12    |     |
| 15) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 503 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Sool                | 17/12/12    |     |
| 16) | Go'aanka Ansixinta Natijada Golayaasha   |             | 509 |
|     | Deegaanka ee Gobolka Sanaag              | 10/12/12    |     |
| 17) | Go'aanka Guddiga Diiwaan galinta Ururada |             | 511 |
|     | iyo axsaabta Qaranka                     |             |     |

**QAYBTA KOWAAD:**  
**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:**

**GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE**  
**2013ka, IYO LIFAAQYADA KU LAMAAN**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada **54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.

**MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku iftiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2013da**

**MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.

**MARKUU KA DOODAY:** Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.

**MARKUU U CODEEYAY:** Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2013ka** iyo lifaaqa ku lamaan, kal- Fadhigii **20aad** fadhigisi **6aad** ee **30/12/2012** oo ay goob joog ahaayeen **44 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

**WUXUU COD AQLABIYAD AH (36 COD) OO GACANTAAG**  
**AH KU ANSIXIYAY**

1. Odoroska miisaaniyada **Dawlada Dhexe, Dawladaha Hoose , Baanka Dhexe , Dekada Berbera , Wakaaladaha Biyaha , Haamaha Shidaalka Berbera, Warshada laydhka Hargaysa , Warshada laydhka Berbera, Madbacada Qaranka , Wasaarada Duulista Iyo Hawada iyo Deeqda Sanduuqa Trust fund, ee 2013kaa oo qadarkeedu dhan yahay 1,043,127,269,668 \$I.Sh (haltirilyan, sadex iyo afartan bilyan, boqoliyo todaba iyo**

**labatan milyan, laba boqol sagaal iyo lixdan kun ,lixboqoliyo lixdan iyo sidedd shilin )**

2. Miisaaniyada Maamulka Dawlada Hoose	71,156,929,083
Miisaaniyada Baanka Dhexe	19,469,940,780
Miisaaniyada Dekadda Berbera	43,569,997,677
Miisaaniyada Wakaladaha Biyaha	43,242,223,166
Miisaaniyada Haamaha Shidaalka Berbera	9,105,342,000
Deeqda Sanduuqa Trust Fund	78,000,000,000
Miisaaniyada Warshada laydhka ee Hargaysa	16,385,620,137
Miisaaniyada Warshada laydhka ee Berbera	8,361,034,140
Miisaaniyada Madbacada Qaranka	2,622,202,685
Wasaarada Duulista & Hawada	1,213,980,000
Miisaaniyada Dawlada Dhexe	750,000,000,00

**3. Lifaayada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey Miisaaniyada:-**

**b. Lifaaqa 1aad** :-Wax ka badalka tacriifadaha cashuuraha Wasaarada Deeganka ,Wasaarada Ciyaaraha iyo Dalxiiska, Wasaarada Maaliyada,Wasaarada Arimaha Gudaha ee sanadka 2013

**t. Lifaaqa 2aad** :- Siyaasada Guud ee Miisaaniyada

**4. Talo soo jeedinta Golaha Wakiilada ee Miisaaniyada Qaranka ee 2013 :-**

1. Soo dhamaystirka shuruucda Hay'adaha aan wali Golaha La horkeenin
2. In si degdega wax looga qabto dhismaha xabsiga Burco

Ansixinta Miisaaniyada iyo Lifaayada ku lamaan waxaa **ka aamusay (hal Mudane)** waxa diiday lix I(6) Mudane, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelayaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

**ALLAA MAHADLE**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha**  
**Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**  
**Ku-simaha Gudoomiyaha, ahna**  
**Gud Ku-xigeenka 1aad ee Golaha**  
**Wakiilada JSL**

## QAYBTA LABAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

JSL/M/XERM/249-1492/122012

31/12/12

## **XEER MADAXWEYNE Lr: 0279/122012**

**Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2013-ka**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;**

**Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;**

**Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan  
Lr. GW/G/KF-20/584/2012 ee ku  
taariikhaysan 31/12/2012 ee ay ku  
ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka  
2013-ka ee Dawladda Dhexe,  
Dawladda Hoose, Baanka Dhexe,  
Dekedda Berbera, Wakaaladaha  
Biyaha, Haamaha Shidaalka Berbera,  
Warshadda Laydhka Hargeysa,**

**Warshadda Laydhka Berbera,  
Madbacadda Qaranka, Wasaaradda  
Duulista iyo Hawada iyo Deeqda  
Sanduuqa Trust Fund iyo Lifaagyada  
ku lamaan;**

### **Wuxuu Soo Saaray**

**Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Miisaaniyad  
Sannadeedka 2013-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladaha  
Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha  
Biyaha, Haamaha Shidaalka Berbera, Warshadda  
Laydhka Hargeysa, Warshadda Laydhka Berbera,  
Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada  
iyo Deeqda Sanduuqa Trust Fund iyo Lifaagyada ku  
lamaan.**

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Ku: Dhamaan Wasaaradaha/Hay'adaha Dawladda Hargeysa**
- Ku: Dhamaan Wakaaladaha iyo Hay'adaha Madaxa Banaan Fadhiyadooda**
- Ku: Dhamaan Maayarada Dawladaha Hoose ee Dalka Fadhiyadooda**
- Ku: Dhamaan Gudoomiyayaasha Gobolada Dalka Fadhiyadooda**
- Og: Hantidhawraha Guud ee Qaranka Hargeysa**
- Og: Guddida Siyaasadda Miisaaniyadda 2013 Hargeysa**
- Og: Madaxweyne Ku-xigeenka JSL Hargeysa**

### **Ujeedo: Siyaasadda Guud ee Miisaaniyadda 2013**

Sida aynu la wada socono waxaynu sannadkii 2012 markii ugu horaysay soo saarnay Siyaasada Miisaaniyada Qaranka, taas oo lifaaq ahaana loo raaciyey Miisaaniyadii Golaha Wakiiladuna ansixiyeen. Nuxurka ay xambaarsanayd siyaasadaasi waxay ahayd nidaamkii lagu maamulayay Miisaaniyadda sannadkaas iyo qodob sharciyayn ubaahnaa oo la sharciyeeyay, dhamaantoodna ay fuliyeen hay'adihii ku shaqada lahaa.

Qodobadii Siyaasadda Miisaaniyadaas ku jiray ee sharciga ahaa waxay noqon doonaan kuwo sidooda loo fuliyo markasta ilaa inta wax ka-bedel lagu samaynayo. Haddaba, iyadoo laga duulayo shirkii qiimaynta waxqabadkii xukuumadda iyo Qorshaha sannadka cusub, lana tixglinayo

taladii Guddida Diyaarinta Siyaasadda Miisaaniyadda 2013, waxaan madaxda warqadani ku socoto ku wargelinayaa inay fuliyaan wixii ka khuseeya Qodobada hoos ku qoran ee ay ka koobantahay Siyaasadda Miisaaniyadda 2013 oo ah sidan:

#### **A. Siyaasadda Guud ee Miisaaniyadda 2013**

1. Waa in deeqaha tooska ah ee Caalamiga ah ee Dawladda la siiyo ay ka muuqdaan Miisaaniyadda Dawladda Dhexe. Sidoo kale, deeqaha Caalamiga ah ee dadban waa in lifaaq ahaan loo raaciyaa Miisaaniyadda Qaranka, si loo ogaado dhamaan Dakhliga dalka soo gala nooc kasta oo uu yahay.
2. Waa in Wasaaradda Qorshayntu soo gudbiso lacagta Sanduuqa horumarinta Somaliland (Somaliland Trust Fund), si loo raaciyo Miisaaniyadda 2013.
3. Waa in Mashaariicda horumarinta ee Miisaaniyadda 2013 meel la isugu geeyo, loona sameeyo madax-xige u gaar ah oo lagu magacaabo Madax-xigaha Mashaariicda Horumarinta Dawladda.
4. Maadaama Qorshaha Horumarinta Dawladda ee 2013 ay ka mid tahay in Wadooyinka dalka wax laga qabto; waa in Dawladaha Hoose dakhliga 10% ka ah ee Wasaaradda Maaliyaddu u qabato **20%** ka mida qaadhaan ahaan ugu daraan qorshaha horumarinta wadooyinka Miisaaniyadda 2013.
5. Waa in Miisaaniyadda Dawladaha Hoose kharashka shaqaaluhu noqdaa ugu yaraan **25%**, kharashka hawl socodsiintuna noqdaa ugu badnaan **30%**. Sidoo kale,



kharashka mashaariicda horumarinta ee aanay ku jirin deeqaha hay'adaha caalamiga ah, isna waa inuu noqdaa ugu yaraan **35%**, kharashka deeqda dawlada hoose siiyaan Hay'adaha Dawladda Dhexe ee deegaanadooda isna waa inuu noqdaa ugu badnaan **10%**. Waxaana dabagelkeeda yeelanaya oo u xilsaaran arrintan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradda Maaliyadda.

6. Kharashka Kabka Dawladaha Hoose waa in uu dhamaantii ku baxaa mashaariic horumarineed, marka laga reebo Dawladaha Hoose ee derajadoodu yihiin B, C, D oo iyagu waxay helaan tahay waxa ku baxa kharashka hawl socodsinta. Fulinta arrintana waxa u xil saraan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradda Maaliyada.
7. Waa in hay'adaha wax soo saarka sida Wakaaladaha Biyaha, Dekeda, Baanka, iyo Haamaha kharashkoodu uu noqdo **30%** Mashaariic horumarineed.
8. Waa In Wasaaradda Qorshaynta iyo Wasaaradda Maaliyaddu si wada jir ah u dabagalaan Mashaariicda Horumarinta Dawladda Dhexe, kuwa Caalamiga ah iyo hayadaha madaxa banaan ee dawlada.
9. Waa in Dakhliga Fuel Levy-ga, Road Levy-ga iyo License Levy-ga ay galaan Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, isla markaana Dakhliga Fuel Levy-ga ee 2013 loogu soo iibiyaa qalab Wadooyinka , laguna daraa qaybta Mashaariicda Horumarinta. Sidoo kale, waa in kharashkii daryeelka wadooyinka ka baxsan Magaalooyinka mudnaan lasiiyaa Miisaaniyadda 2013. Si loo horumariyo

wadooyinka, waa in Wasaaradda Madaxtooyada iyo Wasaaradda Hawlaha Guud ay diyaariyaan qaab suurtagelinaya in wadooyinka halbawlaha ah la dhigo nidaamka Qaadhaanka lagaga uruuriyo wadooyinka (Toll Collection Fee), iyadoo wixii sharci nidaamiye ah loo gudbin doono Golayaasha Sharci Dejinta, wixii farsamo ahna loogu diyaarin doono sida ugu fiican.

10. Waa in dakhliga **2%** Gobolada Bariga lagu daro miisaaniyadda Dawladda Dhexe isla markaana kharashkiisu noqdo **55%** mashaariic hormarin Gobolada Bariga iyo **45%** fidinta maamulka Gobolada Bariga. Awooda bixinta khaarashkaana waxaa leh Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.
11. Waa in sanduuqii hawlgabka ee loo sameeyey Shaqaalaha Dawladda Dhexe sannadkii 2012 lagu daraa ciidaamada Dawladda. Sidoo kale, waa in Dawladdu sanduuqaas Miisaaniyadda 2013 ku kabto qadar leeg **50%** lacagta laga gooyay shaqaalaha 2012. Waana in si degdeg ah sanduuqaas loogu sameeyo xeerkii hawlgabka ee lagu dhaqi lahaa. Duruufaha dhaqaale ee jira dartood, waa in aan shaqaale cusub la qoran sanadka 2013, marka laga reebo wixii aan laga maarmayn.
12. Waa in sannadka 2013 Miisaaniyadda loogu daraa kharashka Diiwaangelinta Muwaadiniinta **\$1,000,000** (Hal Milyan oo doolar), sidoo kale dakhliga dawlada hoose uga soo xarooda Aqoonsiga Dhalashada (ID) ay kaga qayb qaataan qaadhaanka Diiwaangelinta Muwaadiniinta, taas oo xisaab looga furo Baanka.

13. Waa in dhamaan mucaawinooyinka raashinka iyo wixii kale ee ka yimaadda Hay'adaha Caalamiga ah sida WFP iyo Wadamada Islaamka ah dhamaantood maamulkooda la hoos geeyo Wasaaradda Dib-u-dejinta, isla markaana Xafiiskii Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka (FCA) waa in lagu daraa Wasaaradda Dib-u-Dejinta.
14. Waa in la aasaaso Xafiiskii Sekada kaas oo maamul ahaan hoos-tagii doona Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta, dakhligiisuna uu ku xaroonayo khasnadda Dawladda (Wasaaradda Maaliyadda) si waafaqsan sharciga iyo nidaamka Sekada.
15. Wasaaradda Maaliyaddu waa in **\$10-ka** ee madaaradu uu noqdaa Dakhli Dawladeed, isla markaasna Wasaaradda Maaliyaddu waa inay kab ahaan ugu darto Miisaaniyadda Baanka ee 2013.
16. Waa in dib loo aasaaso Ciidankii Ilaaladda Cashuuraha (Turbataariyada), tiradiisuna noqotaa 120 askari, kaas oo yeelandoona hogaan gaara oo la shaqayn doona Wasaaradda Maaliyadda, lagana soo xulo Ciidankii sannadkii 2011 Booliisku qaatay ee ahaa ardaydii ka soo baxday Dugsiyadda Sare iyo Jaamacadaha.
17. Waa in deynta mishiinada Wershadda Laydhka Berbera lagu leeyahay ee dhan \$595,000 (Shan Boqol iyo Shan iyo Sagaashan Kun oo Dollar) loo bixiyaa sidan: Wasaaradda Maaliyaddu waa inay bixisaa \$200,000; Dawladda Hoose ee Berbera waa inay bixisaa \$200,000; Dekedda Berbera waa inay bixisaa \$100,000; sidoo kale Wershada Laydhka Berberina waa inay bixisaa \$95,000 taas oo horumarin ahaan looga sii qaadayo, Wersheduna

ay bishiiba bixin doonto \$3,000 inta deyntu ka dhamaanayso.

18. Waa in la baabiyaa dhamaan xidhmooyinka dhulka ee aan wax soo saarka lahayn muddo lix bilooda gudahood ah, arrintaana waxaa u xil saaran Wasaaradaha Deegaaanka, Beeraha, Xannaanada Xoolaha, Arrimaha Gudaha iyo Wasaaradda Qorshaynta.
19. Waa in shirkadaha maalgashiga ee Ganacsiga nooc kasta oo uu yahay lacagaha ay bixiyaan lagu shubo khasnada Dawladda.
20. Waa in la aasaaso sharciyada Caymiska nooc kasta oo ay yihiin.
21. Waa in Guddida Siyaasadda Miisaaniyadda Saddex biloodkiiba halmar ay kulmaan, si qiimayn ay ugu sameeyaan Siyaasaddii Miisaaniyadda 2013.

## **B. Dakhliga Miisaaniyadda 2013**

Ku talagalka Dakhliga Miisaaniyadda 2013 waxa uu noqonayaa sidan:

<b>S/N</b>	<b>Hayada</b>	<b>SL.SH./=</b>	<b>Dollar</b>
1.	Dawladda Dhexe	<b>750,000,000,000</b>	<b>\$125,000,000</b>
2.	Hayadaha Madaxa Banaan	<b>215,127,269,668</b>	<b>\$35,854,545</b>
3.	Dawladaha Hoose	<b>71,156,929,083</b>	<b>\$11,859,488</b>
4.	Dakhliga Deeqaha caalamiga ah (Trust Fund)	<b>78,000,000,000</b>	<b>\$13,000,000</b>
	Isugeyn	<b>1,114,284,198,751</b>	<b>\$185,714,033</b>

## Dakhligaasina waxa uu ka imanayaa:

- Kastamada
- Cashuuraha Berriga
- 2% Gobolada Bariga
- Hayada Wadooyinka
- Haamaha
- Isgaadhsiinta
- Liisamada Ganacsiga
- Kirada guryaha Dawladda
- 50% kabka Dawladaha hoose
- Macdanta
- Kaluumaysiga
- Deeqaha hay'adaha madaxabanaan ee dawlada.
- Beeraha
- Kirada Maxjarada
- Dakhliga hay'adaha Madaxa banaan
- Dakhliga dawlada hoose
- Deeqaha caalamiga ah ee tooska ah (trust fund)

1. Sidii ay wada tashiga ku gaadheen Gudidda Siyaasadda Miisaaniyadda 2013, Rugta Ganacsiga iyo Ganacsatadda Somaliland, Qiimaha Sarifka Doolarka ee lagu qiimeeyo badeecadaha soo dega waxaa uu noqon doona **\$1 = 4,500 SL.SH.**, arrintaas oo dhaqan geli doonta 01/01/2013.

2. Waa in Cashuurta Wado Marista Gaadiidka lagu kordhiyaa **50%**, marka laga reebo Gaadiidka Dadwaynaha (Public Transport).
3. Sidii ay wada tashiga ku gaadheen Guddida Siyaasadda Miisaaniyadda iyo Guddida Qaadka, waa in berdaanka Miisaanka Qaadka lacashuuraa **90%**, waxaana la dhaqan gelin-doonaa 01/01/2013.
4. Waa in gaadiidka soo dega ee Raaxada (Luxury), Cashuurtiisa soo dejinta lagu kordhiyo **20%**.

### **C. Kharashka Miisaaniyadda 2013**

1. Kharashka Dawladda Dhexe waxaa saldhig u noqonaaya dakhliga oo ku tala-galkiisu yahay **750,000,000,000 SH.SL.** oo u dhiganta **\$125,000,000**. Kharashkaas waxa mudnaanta lasiin doonaa sannadka 2013 qodobada hoos ku qoran:
  - a. Nabadgelyada; gaar ahaan saanada, qalabka, tababarka ciidamada iyo darajada ciidamada.
  - b. Diyaarinta Siyaasadda Arrimaha Dibedda iyo dardargelinta Ictiraaf-raadinta.
  - c. Horumarinta iyo dib-u-habaynta cadaalada.
  - d. Shaqo abuurka Iyo horumarinta dhalinyarada.
  - e. Kaabayaasha dhaqaalaha sida: Dhismaha Wadooyinka iyo dib u dhiska xafiisyada dawlada.
  - f. Wax soo saarka; sida xoolaha, beeraha, kalluunka, deegaanka iyo warshadaha.
  - g. Adeega bulshada; sida waxbarashada, caafimaadka iyo biyaha.

- h. Diiwaangelinta Muwaadiniinta.
2. Waa in kharashka shidaalka Miisaaniyadda 2013 Wasaaradda Maaliyaddu ay bixiso bil walba dhamaadkeeda, Wasaaraduhuna aanay soo gudbin wax ka badan cadadka bishii ugu jira miisaaniyadda, isla markaana waa in aan madax-xigaha shidaalka looga soo wareejin karin kharash Madax-xige kale.
  3. Waa in kharashaadka soo noqnoqda (**Recurrent Expenses**) sida shidaalka, stationaryga, spare part-ka IWM ay sannad Miisaaniyeedka 2013 noqdaan kuwii sannadkii 2012.
  4. Waa in la mideeyo labada Madax-xige ee safarada gudaha iyo habeen dhaxyada, kharashaadkii 2012 Hay'adaha iyo Wasaaradaha ugu jiray Madax xigaha safarada gudahana waxa lagu wareejinayaa madax-xigaha habeen dhaxyada Miisaaniyadda 2013.

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**XEER MADAXWEYNE No: 0277/122012**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagadan;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu ku Qancay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Axmed Cumar X. Cabdilaahi (Xamarji), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Maroodijeex ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



**XEER MADAXWEYNE No: 0278/122012**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha  
Gobolladu u leeyihiin dhismaha  
Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta  
jagadan;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu ku Qancay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo  
hufnaantiisa shaqo;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cali Maxamed Cilmi, laga bilaabo taariikhda maanta uu  
ahaado Gudoomiyaha Gobolka Saaxil ee Jamhuuriyadda  
Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ku: Mudane, Maxamud Cali Saleebaan (Ramaax)  
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Saaxil Berbera**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hargeysa**

**Ujeedo: Xil-ka Qaadis**

**Mudane,**

**Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo, wakhtigan xaadirka ahna waxaa aan gartay in xilkii Gudoomiyaha Gobolka Saaxil aan kaa qaado una magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.**

**Sidaa darted, waxaan ku farayaa in xilka aad ku wareejiso Mudane, Cali Maxamed Cilmi oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Saaxil.**

**Waxa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiyaha Gobolka Saaxil.**

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**QAYBTA SADEXAAD:**  
**DIGREETOYINKA, WAREEGTOYINKA, AMARADA**  
**IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM**

XEER WASIIR NO. 2512/12/12

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Anigoo ka duulaaya: - qabsoomida Doorashadii Golaha Deegaanke ee qabsantey 28/11/2012, kuna dhamaatay Nabadgelyo & Guul.

Anigoo u hambalyaynaya: - Dhamaan xildhibaanada ku guuleystay Doorashadii dhacday una rajeynayaa waxqabad & wada shaqayn.

Anigoo ka tixraacaya: - Qodobka 62aad ee Xeerka Ismaamulka Gobolada & Degmooyinka farqadiisa (1,2,3 iyo 2aad) ee cadaynaya Doorashada Duqa iyo Ku-Xigeenka ee Golaha cusub ee la doortay.

WAXAA UU SOO SAARAY

In mudanayaasha cusub fadhigoodu ay ku qabsan karaan sidan soo socota:-

- 1- Laga bilaabo marka maxkamada Gobolku soo saarto Natiijada Kama danbeysta ah waxa goluhu fadhigiisa ku qabsoomayaa shan iyo taban casho (15) gudahood, sida ku cad qodobka 62 farqadiisa 1, aad ee xeer. No. 23/20012

- 2- Waxaa fadhiga 1 aad Guddominaya isla markaan dhaarinaya Guddomiyaha Maxakamada Gobolka ama Garsoore uu igmaday oo ka tirsan Garsoorayaasha maxkamada Gobolka ama Degmada.
  
- 3- Dhaarta kadib waxa guddoonka shirka la wareegaya Mudanaha ugu da'da weyn waxaana la dooranayaa Duqa iyo kuxigeenkiisa, waxaana fadhigaas Goob joog ka noqonaya Guddomiyaha Gobolka ama cid uu igmaday oo ka tirsan hawl-wadeenada Gobolka, ugu danbeyn waxaa natiijada loo soo gudbinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ALLAA MAHAD LEH

MAXAMED NUUR CARAALE (DUUR)

WASIIRKA WASAARADA ARRIMAHA GUDAHA JSL



**WC&A.G /XW/G-2/ /12**

**Date: 22/12/2012**

Ku: Garyaqaanka Guud ee Qaranka

=Hargeysa=

Ku: Radio Hargeysa,

=Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV,

=Hargeysa=

Ku: Wargeyska Jamuuriya, Ogaal, Geeska Africa,

=Hargeysa=

Og: Guddoomiyayaasha Gobolada JSland,

=Fadhigooda=

Og: Dhamaan Guddoomiyayaasha Maxk, Racfa, Gobol, Degmo, =Fadhigooda=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL,

=Hargeysa=

Og: Maxadaxweynaha JSland,

=Hargeysa=

**UJ: FULIN GO'AAN KA SOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA JSL.**

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka **106aad** ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa **1aad**, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu Halkan ku faafinaynaa Go'aanka Lanbarkiisu yahay **MS/GGC/G-3/36/2012** ee **20/12/2012**. Kaas oo lagu magacaabay Garsooreyaasha hoos ku qoran:

**MAGACAABID GARSOORAYAAL.**

1. **Yuusuf Jaamac Geelle** Waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada **Gobolka Sanaag**.

2. **Guuleed Daa'uud Axmed** Waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Sanaag**
3. **C/Salaan Xasan Axmed** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Sanaag**.
4. **Maxamuud Cabdi C/laahi** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Sanaag**
5. **Siciid Xasan Yuusuf** Waxa loo magacaabay Garsoore Maxkamada **Degmada Ceeri-gaabo**
6. **Siciid C/laahi Xuseen** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Degmada Ceeri-aabo**
7. **Maxamed Jibriil Cilmi** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamada **Gobolka Togdheer**.
8. **C/laahi Cali Cismaan** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamada **Gobolka Togdheer**.
9. **Sakariye Maxamed Shirwac** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamada **Degmada Burco**.
10. **Aadan Axmed Muuse** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Degmada Burco**
11. **Axmed Maxamed Ismaaciil** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Awdal**.
12. **C/shakuur Cali Maxamed** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Awdal**.
13. **C/casiis Khadar Diiriye** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Awdal**
14. **Maxamed Xuseen Caraale** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Degmada Boorame**
15. **Axmed Ibraahim Cali** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Saaxil**.

16. **Cabdi Maxamed Saleebaan** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gobolka Saaxil**
17. **C/kariim Cumar Cabdi** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gob/Deg, Gebilay**
18. **Maxamed Carab Qalinle** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Gob/Deg, Gebilay**
19. **C/najiib Maxamed Cali** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxkamadda **Degmada Salaxley**
20. **Maxamuud C/risaaq Max'ed** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxk. **G/Maroodi-Jeex Hargeysa.**
21. **Asad Nuur Cilmi** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxk. **G/Maroodi-Jeex Hargeysa.**
22. **Mawliid Maxamed C/lahi** Waxaa loo magacaabay Garsoore Maxk. **G/Maroodi-Jeex Hargeysa.**
23. **C/shakur Maxamed Ismaaciil** Waxaa loo magacaabay Maxk. **Degmada Gacan-Libaax Hargeysa**
24. **Jaamac Siciid Jibriil** Waxaa loo magacaabay Maxk. **Degmada Koodbuur Hargeysa**
25. **Maxamed Axmed Cabdi** Waxaa loo magacaabay Maxk. **Deg/Axmed Dhagax Hargeysa**
26. **Yaxye Xuseen Yuusuf** Waxaa loo magacaabay Maxk. **Degmada Maxamuud Haybe Hargeysa.**
27. **Aadan Maxamed Cali** Waxaa loo magacaabay Maxk. **Degmada 26-Juun(Xarunta) Hargeysa.**

28. **Garyaqaan, Khadra Maxamed Faarax**, waxaa loo Magacaabay Maxkamadaha **G/Maroodi-Jeex Diiwaan-Haye Guud**.
29. **Garyaqaan Hodan Faarax Ibraahim**, waxaa loo Magacaabay Maxkamadaha **G/Maroodi-Jeex Diiwaan-Haye Guud**.
30. **Garyaqaan lido Caydiid Yuusuf**, waxaa loo Magacaabay Maxkamadaha **G/Maroodi-Jeex Diiwaan-Haye Guud**.
31. **Garyaqaan Hadiya Cumar Ibraahim**, waxaa loo Magacaabay Maxkamadaha **G/Maroodi-Jeex Diiwaan-Haye Guud**.
32. **Garyaqaan Sahra Cabdi Cabeeye**, waxaa loo Magacaabay Maxkamadaha **G/Maroodi-Jeex Diiwaan-Haye Guud**.
33. **Garyaqaan Qamar Cilmi C/laahi**, waxaa loo Magacaabay Maxkamada Diiwaan-Hayaha Guude ee Maxkamada **Degmada Boorame**.

**ALLAA MAHAD LEH.**

Xuseen Axmed Caydiid

**WASIIRKA W/CADAALADDA & ARR.GARSOORKA.**



## **Wax ka Bedelka Tacriifada**

Sida caadadu tahay waxaa wax ka bedel iyo dub u eegis lagu sameeyaa tacriifooyinka Cashuuraha iyo Adeegyada Dawladdu qaado sanadkiiba hal mar.

Sidaas darteed; Sanadkan waxaa laysla qaatay in wax ka bedel lagu sameeya tacriifooyinka Cashuuraha waana sidan soo socota:

S/N	Magaca Wasaaradda	Nooca Cashuurta/Fee ga	Tacriifadii Hore	Tacriifada Cusub
1.	Wasaaradda Deegaanka	Ruqsada Cawska(Grass Permit)	30,000/=	100,000/=
		Cashuurta Cawska B/Buurta 3-6 Ton	20,000/=	70,000/=
		Cashuurta Cawska B/Buurta 7-19 Ton	50,000/=	120,000/=
		Cashuurta Cawska B/Buurta 20 Ton ka badan	90,000/=	160,000/=
		Cashuurta Cawska Dameerka/Fardaha	10,000/=	20,000/=
		Cashuurta Cawska Awrka	10,000/=	25,000/=
		Cashuurta Nuurada/Xaabada Baabuurka 6 ton ah	10,000/=	30,000/=
		Ruqsada Berkadaha	10,000/=	150,000/=
		Cashuurta Berkadaha sanadkii	20,000/=	150,000/=
		Liisanka Ganacsiga Xaabada Sanadkii	40,000/=	150,000/=
		Liisanka Ganacsiga Nuurada Sanadkii	100,000/=	300,000/=
		Maydiga 100Kg	15,000/=	50,000/=

		<b>Maxoorka Fooxa 100Kg</b>	<b>10,000/=</b>	<b>35,000/=</b>
		<b>Malmalka 100Kg</b>	<b>5,000/=</b>	<b>15,000/=</b>
	<b>Ganaaxa Xoolaha Ruqsad la'aanta gala seerayaasha</b>	<b>Geella</b>	<b>1,500/=</b>	<b>15,000</b>
		<b>Lo'da</b>	<b>1000/=</b>	<b>10,000/=</b>
		<b>Adhiga</b>	<b>500/=</b>	<b>7,500/=</b>
		<b>Dameero/Fardo</b>	<b>1000/=</b>	<b>10,000/=</b>
<b>2.</b>	<b>Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dalxiiska</b>	<b>Dalxiiska (Laas-geel I.W.M)</b>		<b>\$25 per person</b>
<b>3.</b>	<b>Wasaaradda Maaliyadda</b>	<b>Cashuurta Baabuurta yaryar ee raaxada ah(Salon Car and Station Wagon)</b>	<b>70%</b>	<b>90%</b>
		<b>Cashuurta Wado Marista</b>	<b>Fixed</b>	<b>Kordhin 50% marka laga reebo gaadiidka dadweyana ha</b>
<b>4.</b>	<b>Wasaaradda Arimaha Gudaha</b>	<b>Warqada Dembi La'aanta</b>	<b>6000/=</b>	<b>60,000/=</b>
<b>5.</b>	<b>Wasaaradda Arimaha Gudaha</b>	<b>Cusboonaysiinta Passport ka Somaliland</b>	<b>\$150</b>	<b>\$50</b>

**QAYBTA AFRAAD:**  
**AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND.**

**MAXAKAMADDA GOBOLKA TODHEER.**

**MGT/ /2012.**

**11/12/2012**

UJEEDDO: - **Ansixin Go'aankii Gudida Komiishanka**  
**Degmooyinka.**

**Burco, oodwayne, Buuhoodle.**

Maxakamadda Gobolka Togdheer Burco.

Markay aragtay: - Liisaska Go'aanka Gudida komishanka ee Degmooyinka kor ku xusan.

Markay Hubisay: - liiska ay soo gudbiyen komiishanka Degmooyinku.

Markay ogaatay: - in aanu jirin Cabatin ay komiishanku u soo gudbiyeen Maxakamaddan.

Markay argatay: - Qodobka Xeer Lambar 20/2001 iyo Lifaqyadiisa Qodobka 62. Faqrada (1.2.3.).

Dhamaan asbaabta kor ku xusan iyo Qodobada sharci.

Waxay soo saartay Go'aankan.

**Go'aankii Maxakamadda.**

- 1- Waxay sidiisii u ansixisay Natijadii Hordhaca ahayd ee ay soo saareen Gudida komishanku ee Degmooyinka kor ku xusan, waana sidan:

**Go'aankii Degmadda Burco iyo Xildhibaanadda Guuleystay.**

- A- Tirada Guud ee Degmadda ka codaysay 130,983.Cod, waxaa ansaxay 129,271.Cod, waxaa Xumaaday 1,712.Cod. majiro cod lagu muran sanyahay (0).

<b>Umadda</b>	<b>Ucid</b>	<b>Kulmiye</b>	<b>Dalsan</b>	<b>Rays</b>	<b>Wadani</b>	<b>Xaqsoor</b>
1- C/RASHIID faarax cali Ducaale	1- C/RISAAQ Xuseen Faarax Janaale	1-Nuux Maxamed Xuseen Aadda	(0)	1-kharad Nuux Siciid Diiriye.	1-Axmed Maxamed Cali Cabdi Afyare	1- Kayse Cabdi Raage Cali
2- Muxumed Xasan jaamac mixle.		2-Ibraahin Jaamac Basaale Gaboobe.		2-Siciid Axmed Maxamed Raage.	2- Maxamud Axmed Xasan Cabdi (Dhagalab )	
3-Farxaan Cabdi Aw Xirsi		3- C/raxmaan Xasan Nuur Ibraahin		3- Maxamed Yusuf Cabdi Buraale Muraad.	3-C/risaaq Xuseen obsiiye Shine	
		4- Mubaarig Yuusuf Cilmi (Bidhi)		4- Maxamed Aadan Cali Ismaaciil Tuurtuur	4-C/xakiin Maxamed C/laahi Shire	
		5- Maxamed Axmed Maxamuud (Diigool)			5-Xirsi Jaamac Cabdi Caynaans he.	
		6-Axmed Cabdi Dhinbil Babdi				
		7-C/risaaq Maxamuud Jaamac dabay.				

**Go'aankii Degmada Buuhoodle (Qori-lugud) iyo Xildhibaanada Guleystay.**

<b><u>Umadda</u></b>	<b><u>Ucid</u></b>	<b><u>Kulmiye</u></b>	<b><u>Dalsan</u></b>	<b><u>Rays</u></b>	<b><u>Wadani</u></b>	<b><u>Xaqsoor</u></b>
1-Xirsi Raygal Warsame Xaydle.	1- Cismaan Faarax Warsame Jiciir.	1-Siciid Maxamuud Sh. Cabdi  2-C/laahi Maxamed Aadan Xirsi.  3-Maxamed Xirsi Aadan Cade.	(0)	1-Nuur C/kariin Maxamed Seed.	1-Axmed Xandule Muuse Ibrahin	(0)

**Go'aankii Degmadda Oodwayne iyo Xildhibaanadda guuleystay.**

<b><u>Umadda</u></b>	<b><u>Ucid</u></b>	<b><u>Kulmiye</u></b>	<b><u>Dalsan</u></b>	<b><u>Rays</u></b>	<b><u>Wadani</u></b>	<b><u>Xaqsoor</u></b>
1-Ibraahin Maxamed Nuur Maxamed 2-Yuusuf Aw Maxamed Dubad. 3-Ibraahin Jaamac Axmed Maxamuud. 4-Maxamed Cumar Cilmi Naaleeye. 5-Muxumed Jaamac Bulaale Maxamed. 6-Muuna Qorane Curaagte Diriye. 7-Saleeban Maxamed Faarax Qaasaali.	1- C/laahi Ciise Cilmi X.Nuur.	1- Farxaan Aw Maxamed C/laahi Colow	1- Maxamed Muxumed C/laahi Xirsi	1- (0)	1-C/xakiin Nuur Muuse Faarax. 2- Shamcaan Maxamuud Maxamed Xusen. 3-Khadar Xuseen Xirsi Cabdi. 4- Maxamed Cabdi Caki Muuse 5-Shaakir Maxamed Jaamac Xayd 6-Cumar Ibraahin Bulaale Maxamed.	1-Cali Cabdi Warsame Geedi.

**(Addan Maxamed Yuusuf)  
Kaaliyaha Sare.**

**(Maxamed Jaamac Cashuur)  
Gudoomiyaha.**

**Maxakamadda Gobolka Tog. Maxakamadda Gobolka Tog**

**MAXKAMADDA SARE**

Supreme Court

المحكمة العليا

TIX: MS/140/012

Taar: 13/12/012

**KU: Taliyaha Saldhiga Booliska K/Buur****KU: Taliyaha Qaybta Booliska Galbeed****KU: Dhamaan Xafiisyada Nootaayooyinka  
Fadhiyadooda****KU: Gudoomiyaha Degmada Ibraahin Kood Buur****OG: Jaraa'idka Madaxa Banaan****OG: Raadyo Hargeysa****OG: Rafcaalayaasha Foosiya Axmed Ducaale oo  
Wakiil u ah 14 kale Degan Hargeysa****Qareeno: 1. Maxamed Axmed  
Abokor iyo Mustafe Mahdi Xaashi****OG: Rafcaanlayaasha Ilma Cabdi Quule.****Ilma Maxamed Quule.****Wakiil U yahay Jamaal Cabdi Quule>****UJEEDO: Amar Xayiraad Dhul**

Tixraaca Arjiga ku Taarikhaysan 12/12/012 una soo gudbisay Wakiilka Rafcaanlayaasha Foosiya Axmed Ducaale oo ku saabsan Codsiga Xayiraad Dhul ku yaala Degmada Ibraahin/Koodbuur, xaafada Boqo Jire. Dhul Beereedka Cabirkiisu yahay 7.68 Higtar

Hadaba iyada oo ay jirto Dacwada Madani ah oo ka furan maxkamada Sare oo ay dhinacyo ka yihiin Rafcaansaneyaal:- Foosiya Axmed Ducaale iyo 14 kale

Rafcaansaneyaal ka yihiin Ilma Cabdi Quule. Ilma Maxamed Quule, oo wakiil u yahay Jamaal Cabdi Quule.

